



Machadka Xagaaga PPS oo macallimiinta ka caawiya in ay hadda u diyaar garoobaan sanad dugsiyedka soo socda.

Sanad dugsiyedkii wuu dhammaaday, laakiin in ka badan 500 oo ah macallimiinta K-5 ayaa shaqo adag hayay iyaga oo isku diyaarinaya sanad dugsiyedka 2018-19 ee Machadka Xagaaga PPS ee ka jira Dugsiga Sare ee Roosevelt. Tababarka labada maalmood ah wuxuu macallimiinta siiyay fursad ay hoos ugu firriyan manhajka cusub ee luqadda farshaxanka, iyo in wax laga dhageysto macallimiinta isla hadaba isticmaalaya. Macallimiintu waxay sidoo kale barteen sida uu manhajku u waafaqsan yahay nidaamyada gobolka iyo baaxadda iyo sida uu iskugu xigxigo nidaamka cusub ee degmadu qaadatay — erey tacliimeed oo loogu talagalay waxa la baran doono iyo sida ay iskugu xig-xigi doonaan.

“Waxay na siiyen waxyaabo fara badan, tilmaamo iyo PowerPoints iyo dhammaan meelahan badan ee internet-ka laga sii gelayo ee gacanta ku haysano taasi oo hawsha aad u sahlaysa,” ayay sheeggtay Heather Smith, oo ah macallimad fasalka labaad u dhigta Woodmere. “Waa inaan si wadajir ah u dhaqaqno isla markaana yeelano dareen hor inta aan sanad dugsiyedku bilaabmin.”

Kani wuxuu ahaa isku soo bixii ugu weynaa weligeed dhaca ee loogu talagalay Machadka Xagaaga, kaasi oo uu soo qaban qaabiyyay Xafiiska Waxbirida iyo Waxbarashada. Qabanqaabiyeysaasha waxay sheegeen in ay muhiim ahayd in macallimiinta la siiyo taageerada ay u baahan yihii si ay u noqdaan macallimiin wax ku ool ah isla markaana si wanaagsan ugu adeega ardaydooda.

“Waxay ku tusaysaa sida ay u haraadsan yihii macallimiintu in aanu maalgelino iyada oo la adeegsanayo horumarinta xirfadeed,” ayay sheegtay Debbie Armendariz, Agaasimaha-Manhajka & Waxbarashada Hoose.

“Waxay wax ka baranayaan nidaamka pedagogy (habka iyo ku dhaqanka), waxay wax ka baranayaan waxyaabaha kala duwan iyo baaxadda ay leeyihii iyo sida ay iskugu xigxigaan iyo nidaamka u yaala waxbarida. Laakiin wax kasta oo kale marka la eego midba midka kale ayuu wax ka baranaa. Waxyaalaha kale ee ay baranayaan waa in aanu daryeelno iyaga isla markaana doonayno in aanu taageerno.”

Maamuleyaasha ka soo qayb galay tababarku waxay aamisanyihiin in manhajka cusub ee isku dheelitiran ee sinnaanta ku saleysan, ee loo yaqaan Qaybaha Waxbarashada ee Akhriska iyo Qorista, uu loolan gelin doono ardayda kaasi oo ah dhammaan heerarka wax akhriska/qorista iyada oo la siinayo fursad ay wax kula doortaan oo dheeraad ah oo ku saleysan waxbarashooda. Waxay sidoo kale loolan gelin doontaaa macallimiinta si ay uga wareegaan wax baridii dhaqanka ahayd ee macallinku mas'uulka ka ahaa hawlaha fasalka "sage on the stage" iyada oo loo wareegayo qaab wax barid oo shakhsii ahaneed oo qofka waxbaranayaa uu nidaamka waxbarasho qaybta ka noqonayo "guide on the side".

"Marka la joogo Woodlawn waxaanu qabaneynaa shaqo wanaagsan oo ah ka wareejinta carruurtayada dhibaatadu ku qabtaasi waxbarasho, laakiin tani waxay naga caawin doontaa in aan carruurteena taagan heer waxbarasho ku riixno in ay xataa shaqo kasii wanaagsan qabtaan," ayay sheegtay Andrea Porter Lopez, Maamulaha Dugsiga Hoose ee Woodlawn.
"Macallimiinteenu waxay yeelan doonaan dareen wanaagsan oo aan kaliya ahayn sida fasalku yahay isaga oo wada dhan, ee laakiin sida shakhsiyadka ardaydu ay yihiin sababta oo ah waxbarashada wey ka weyn tahay mid arayda ku saleysan."

Manhajka waxaa la qaataay 2016, iyada oo loo soo bandhigay 20 dugsi. Sanadka soo socda, 40 dugsi ee soo haray waxay isticmaali doonaan waxyaabaha cusub. Macallimiinta isla hadaba isticmaalaysa nidaamkaasi waxay la shaqeeyeen kuwa loo soo bandhigi doono manhajka sanadka 2018-19.

Iskasta oo Woodmere ay manhajka helayso sanadkan soo socda, hadana Heather Smith waxay qayb ka mid ah ku tijaabisay ardayda fasalkeeda labaad ka hor inta aanu dhammaanin sanad dugsiyedkani. Aad ayay ugu faraxday natiijooyinka.

"Aadayaan ugu faraxsanahay carruurta iyada oo sababtu tahay xataa wax bartayaasha aan leenahay ee dhibaato haysato ayaa dareemay in ay yihiin wax akhristayaal," ayay sheegtay Smith. "Waxba ma aysan akhriyi karayn heerka fasalka labaad hadana, laakiin waxay dareemeen in ay la mid yihiin ardayda kale ee fasalkayga. Waxaa la siisay fursad ay wax kula doortaan oo ku saleysan waxbarashooda, waxaan haystay waqtii dheeraad ah oo aan kula fariisto iyaga oo shaqsi-shaqsi ah si loo dejiyo meel la hiigsanayo ama si loo tilmaamo waxbarashadooda."

-Pamela Jordan